2026

ESSG

employer solutions staffing group LLC

# HAGAHA IS-DIWAANGALINTA CAYMISKA




The American Worker®

Provided by Fringe Benefit Group

Shirkadda Employer Solutions Staffing Group waxay qiimaysaa hal abuur kasta oo uu la yimaado shaqaalahayagu, waxa aan ku faraxsanahay in aan usoo bandhigno xulashooyin caymis oo ay awoodi karaan dhammaan shaqaalahayga Ameerikaanka ah. Waxaa noo muhiim ah in adiga iyo qof kasta oo qoyskaaga kamid ah uu helo caymiska aad u baahan tahay. Fadlan si taxadar dib u eegid ugu samee hagahan is-diwaangalinta si aad u fahamto faa'idooyinka iyo dheefaha aad helayso oo aad u samayn karto xulasho fiican naftaada iyo qoyskaagaba.



## JOOJI LACAGTA BUURAN EE CAAFIMAADKA KAAGA BAXAYSA

## HA OGOLAAN IN LAGUU DIIDO ADEEGYADA CAAFIMAADKA





## KA BAAQSO LACAGTA BUURAN EE AAD QADIMAYSO

## CAAFIMAADKAAGA ILAALI!



# FURSADAADA IS-DIWAANGALINTA CAYMISKA

## MA U QALMAA CAYMISYADAN?

Hadii aad tahay shaqaale ka tirsan Employer Solutions Staffing Group, waxa aad u qalantaa in aad isdiwaangaliso caymiskan. Waa in aad shaqo toos ugu jirto si aad u hesho caymiskan. Waxa kale oo aad helaysaa caymiska xaaska/sawjka iyo carruurta ilaa ay da'doodu ka gaadhayso 26 sanno jir.

## GOORMA AYAAN WAX KA BADALI KARAA AMA AAN JOOJIN KARAA CAYMISKAYGA?

Caymiska kaliya waxaad wax ka badali kartaa ama aad joojin kartaa inta lagu jiro mudada isdiwaangalinta ama 30 cisho gudahood kadib isbedel wayn oo ku yimid noloshaada.

## SIDEE AYAAN ISKU DIWAANGALIN KARAA CAYMIS?

Waxaad isku diwaangalin kartaa caymiska onlayn ahaan, wicitaan taleefan ama taleefankaaga gacanta. Hadii aadan caymiska hadda isdiwaangalin, ma awoodi doontid in aad isdiwaangaliso ilaa laga gaadhayo waqtiga xiga ee ay diwaangalintu furanto, hadii kale waa inuu jiro isbedel wayn oo kusoo kordhay noloshaada.

**TAARIIKHDA DHAQANGALKA CAYMISKA:** 01/01/2026, 01/05/2026, AMA 01/12/2026 IYADOO KU XIDHAN INTA JEER EE AAD LACAGTA BIXISO IYO MUSHAHARKA U HOREEYA EE LAGA JARO CAYMISKA.

**Onlayn isku diwaangali:** Booqo www.TheAmericanWorker.com
1. Dooro **Login and Enroll**
2. Guji **Register & Enroll**

Waxaad isdiwaangalin kartaa waqti kasta habeen iyo maalinba

**Isku Diwaangali taleefan:**

Wac **(800) 517-4785**
Isniin – Jimce
8:00AM - 8:00 PM ET

Taabo 1 si aad isu diwaangaliso
Taabo 2 wixii su'aalo kale ee aad hayso

## CAYMISKA MEC

- Caymis 100% marka aad rabto adeegyada kahortagga daryeelka caafimaadka ee aad isticmaalayso isbitaalada aanu kula jirno caymiska.
- Daawooyinka inta badan la qoro waxa aad bixinaysaa kaliya $10. Daawooyinka qaaliga ah waxa aad ku helaysaa qiimo jaban.
- Waxa aad helaysaa qalab kuu sahlaya in aad sii aragto qiimaha kahor booqashada dhakhtarka ama isbitaalka.
- Waxa aad bixin doontaa qiimo xadidan marka aad booqato dhakhtar, samayso baaritaan shaybaar ama aad raajo marto.
- Waxa aad kula hadli kartaa dhakhtarkaaga si bilaash ah taleefan ama maqal iyo muuqaal.

### SAMAYSO CAYMIS CAAFIMAAD!

Haku khamaarin caafimaadkaaga. Had iyo goor in aad baaritaan iyo kahortag samayso ayaa sahlaysa in la ogaado xilli hore dhibaatada caafimaad ee jirta, kuuna oggolaayansa in aad noqoto qof caafimaad qaba mustaqbalka fog.

Qorshayaashan caymiska caafimaadka jaban ayaa kuu oggolaanaya inaad si fudud u hesho daryeelka aad u baahan tahay. Ku dadaal badqabka iyo caafimaadkaaga oo hadda isdiwaangali!

# QORSHAYAASHA CAYMISKA CAAFIMAADKA DHEERAADKA AH.

## CAYMISKA ILKAHA

Waxaad helaysaa caymis dhan $1000 sannadkiiba, iyadoo $20 laga jarayo mar kasta oo aad la kulanto dhakhtarka.

## CAYMISKA ARAGA

Waxaad helaysaa caymiska baaritaanka indhaha iyo muraayadaha indhaha.

## CAYMISKA NAAFO-NIMADA MUDADA GAABAN

Waxaa lagu siinayaa $150 toddobaadkiiba muddo 26 usbuuc ah.

## CAYMISKA NOLOSHA, SHILKA, IYO LAXAADKA

Waxaa la siin doonaa qoyskaaga $10,000 hadii aad dhimato ama aad gasho dhaawac halis ah.



## FAA'IDOOYINKA CAYMISKA ARRAGA IYO ILKAHA

Daryeelka ilkaha iyo aragu waxay muhiim u yihiin caafimaadkaaga guud. Hadii aadan daryeelin ilkaha iyo aragaaga waxay si aan fiicnayn u saamayn doontaa caafimaadkaaga guud, taaso keenta in aad seegto shaqada, fiicnaan aadan dareemin, kuuna horseedi karta saamayn xun mustaqbalka dhow.

Caymiskani waxa uu ku siinayaa baaritaanada lagama maarmaanka ah si dhibka jira hore loogu ogaado, araga iyo dhoola-cadayntaaduna ay u noqoto mid waarta.



## FAA'IDOOYINKA CAYMISKA XANUUNKA, DHAAWACA, DHIMASHADA IYO SHILKA

Diyaar u noqo waqtiyada adag ee nolosha. Shilalka, jirrada, iyo dhimashada. Saamaynta dhaqaale iyo shucuureed ayaa sidoo kale ah mid xanuunkeeda wadata.

Caymiskani waxa uu ku siinayaa taageero dhaqaale inta lagu jiro waqtiyada adag ee nolosha, taaso kaa caawinaysa in aad ku dadaasho daryeelka naftaada, sidoo kale siinaysa taageerada ay u baahan yihiin qoyskaagu. Ha u oggolaan noloshaada inay kaa kharibaan waxyaabo lama filaan ah oo aadan ku talo-galin.

Caymiska MEC waxaa ku jira baaritaanada hubinta caafimaadka iyo talaalada oo bilaash ah 100% iyo bixinta lacag xadidan oo la socota adeegyada bukaan socodka sida booqashada dhakhtarka, shaybaarada iyo raajooyinka ee isbitaalada ku jira shabakada Caymiska Xadidan ee PHCS. Daawooyinka laguu soo qoro waxaad bixinaysaa lacag yar oo kooban, waxaad sidoo kale helaysaa adeega maqal iyo muuqaalka ah ee lagula hadlo dhakhaatiirta.

Caymiska sare ee MEC waxaa ku jira lacag si maalinle ah laguu siinayo si aad ugu daboosho adeegyada isbitaalka sida booqashooyinka qolka gargaarka degdegga ah, adeegyada suuxdinta, qalliinka iyo daryeelka sare ee loo yaqaan ICU-ga. Lacagtan sida maalinlaha ah laguu siinayo daruuri maaha inaad u isticmaasho isbitaalada aanu caymiska kula jirno laakin waxaad wali isticmaali kartaa isbitaalada shabakada Caymiska Xadidan ee PHCS www.multiplan.com/awp. Hadii aad adeegsato isbitaal aanu caymis kula jirno, waxaa laguugu samayn doonaa qiimo dhimis biilkaaga, adiga oo sidoo kalena heli doona lacagtaadi maalinlaha ahayd, taas oo hoos u dhigaysa qadarka lacagtii aad bixin lahayd.

## WAA MAXAY FAA'IDOOYINKA LA SOCDA CAYMISKA MEC?

- Adeegyada ka hortagga caafimaadku waa bilaash 100% marka aad isticmaalayso isbitaalada aanu caymiska kula jirno.
- Adeegyada caafimaadka waxaa laguugu samaynayaa qiimo dhimis hadii aad isticmaasho Shabakadda Caymiska Xadidan ee PHCS.
- Daawooyinka laguu soo qoro waxaa laguugu samaynaa qiimo dhimis iyo adoo bixinaya qadar yar oo kooban.
- Caymiska sare ee MEC waxa uu ku siinayaa lacag maalinle ah oo aad ku daboosho kharashaadka adeegyada caafimaadka bukaan jiifka ah.
- Adeegyada kale ee dheeriga ah ee ku jira waxaa kamid ah kula hadalka dhakhtarka qaab maqal iyo muuqaal ah, caymiska dhimashada, shilka, dhaawaca iyo waayida laxaadka.
- Inta ugu badan lacagaha la iska qadimo waxaad uga baaqsan kartaa adoo aqoonsi ahaan u tusaya kaadhkaaga shaqaalanimo

## TASHIILO LACAGTAADA - ISTICMAAL ISBITAALADA AANU CAYMISKA KULA JIRNO

Marka aad u tagto isbitaalada aanu wada shaqeynta leenahay, adeegyada sida la kulanka dhakhtarka iyo shaybaarada waxaad ku helaysaa adoo bixinaya qadar yar oo lacag ah. Hoos waxaa ku xusan tusaale muujinaya sida ay lacagtu kuugu tashiilmayso hadii aad u tagto dhakhaatiirta aanu caymiska kula jirno marka aad xanuunsato ama dhaawacanto. **Eeg sawirka hoose si aad u aragto lacagta rasmiga ah ee aad bixinayso ama lagaa cayminayo.**

### TUSAALE

Waxaad u tagtay dhakhtar maadama aad jirran tahay.

La kulanka dhakhtar waxaad u baahan tahay inaad bixiso lacag

**ISBITAALADA AANU WADA SHAQEYNO**

$125 Lacagta Booqashada = Waxaad bixinaysaa $20 kaliya

**ISBITAALADA AANAN WADA SHAQEYN**

Caymiska isbitaalada aanan wada shaqeyn waa uu kala duwan yahay iyadoo ku xidhan qorshaha caymiska aad doorato. Hoos ka eeg faahfaahinta caymiska aad heli karto hadii aad isticmaasho isbitaalada aanan wada shaqeyn.

# QORSHAYAASHA CAYMISYADA MEC

| | CAYMISKA MEC | CAYMISKA SARE EE MEC |
|---|---|---|
| *SHIRKADDA AAD U SHAQEYSO AYAA BIXINAYSA – WAA INAAD ISTICMAASHO ISBITAALADA KU JIRA SHABAKADA PHCS. | | |
| Caymiska Caafimaadka Aasaasiga ah (MEC) | Caymiskani waxa uu 100% daboolaya adeegyada kahortagga sharciga caymiska caafimaadka oo dhan. **Waa inaad booqato isbitaalada ku jira shabakada PHCS si aad u hesho caymiska.** | |
| Booqashada Xafiiska Dhakhtarka | Kaliya bixi $20; Booqashadu Xad Maleh | $20 copay; Booqashadu Xad Maleh |
| Dhakhtar Takhasus leh | $50 copay; Booqashadu Xad Maleh | $50 copay; Booqashadu Xad Maleh |
| Daryeel degdeg ah | $50 copay; Booqashadu Xad Maleh | $50 copay; Unlimited Visits |
| Baaritaan Shaybaaar | $60 copay; Shaybaarku Xad Maleh | $60 copay; Shaybaarku Xad Maleh |
| Duugid | $75 copay; Booqashadu Xad Maleh | $75 copay; Booqashadu Xad Maleh |
| Noocyada kala duwan ee sawirka | $200 copay; Booqashadu Xad Maleh | $200 copay; Booqashadu Xad Maleh |
| Daawooyinka<br>-Kuwa jaban<br>-Kuwa qaaliga ah<br>-Inta caymisku bixinayo | CerpassRx<br>Kaliya bixi $10<br>Ku hel qiimo jaban<br>Lacagta laga bixinaya xad maleh | CerpassRx<br>Kaliya bixi $10<br>Ku hel qiimo jaban<br>Lacagta laga bixinaya xad maleh |
| ADEEGYO DHEERI AH - ADEEGYADAN WAXAA LAGA BIXIN DOONAA QOFKIIBA HAL MAR SANNADKII. | | |
| Qolka xaaladda degdegga ah (Jirro) | Ma bixinayo adeegan | $250 maalinkii; 2 maalmood sannadkii |
| Lacagaha Magdhowga Qalliinka<br>-Lacagta qalliinka bukan jifka<br>-Lacagta qalliinka bukan socodka<br>-Lacagta qalliinka ilmo yar oo bukaan socodka ah<br>-Lacagta ugu badan ee bukaan socodka | Ma bixinayo adeegan | $1,500 maalinkii, 1 maalin sannadkii<br>$ 750 maalinkii<br>$150 maalinkii<br>1 maalin sannadkii |
| Daawada Suuxdinta | Ma bixinayo adeegan | Waxaa laga bixinayaa 30% |
| Isbitaal Jiifin | Ma bixinayo adeegan | $500 halkii mar ee isbitaal lagu jiifiyaba |
| Lacagta isbitaal dhigida<br>Qolka ICU-ga<br>Dhaqan-celinta<br>Xanuunada Maskaxda<br>Kalkaaliso (Isbitaal jiifin) | Ma bixinayo adeegan | $500 maalintii; 500 cisho ugu badnaan<br>$1,000 maalintii; 30 cisho sannadkiiba<br>$250 maalintii; 30 cisho sannadkiiba<br>$250 maalintii; 30 cisho sannadkiiba<br>$250 maalintii; 60 cisho halkii jiifinba |
| *Shabakadda PHCS | Dhakhtarka iyo Isbitaalka | Dhakhtarka iyo Isbitaalka |
| *Adeegyada caafimaadka maqal iyo muuqaalka lagu helo | Ku hel bilaash hadii aad kula hadlayso dhakhtarka taleefan ama aaladaha maqal iyo muuqaalka fududeeya | Ku hel bilaash hadii aad kula hadlayso dhakhtarka taleefan ama qaab onlayn ah |
| *Qalab Qiimaha Kuu Sheegaya | Oggow qiimaha kahor ballanta | Oggow qiimaha kahor ballanta |
| *Kharashaadka Shilka | $5,000 ugu badnaan halkii shilba | $5,000 ugu badnaan halkii shilba |
| *Dhimashada Kadiska ah iyo Waayida Laxaadka | $15,000 Shaqaalaha<br>$7,500 Xaaska/Sawjka / $3,000 Ilmaha | $15,000 Shaqaalaha<br>$7,500 Xaaska/Sawjka / $3,000 Ilmaha |

| HEERARKA | CAYMISKA MEC | | | CAYMISKA SARE EE MEC | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | TODOBAADLE | LABA TODDOBAADLE | BILAHA NUS-BILLAHA AH | TODOBAADLE | LABA TODDOBAADLE | BILAHA NUS-BILLAHA AH |
| Shaqaale kaliya | $26.44 | $52.90 | $57.29 | $37.14 | $74.23 | $80.50 |
| Shaqaale + Xaaska/Sawjka | $41.64 | $83.29 | $90.22 | $68.41 | $136.84 | $148.25 |
| Shaqaale + Ilme/Caruur | $37.40 | $74.81 | $81.03 | $56.66 | $113.36 | $122.79 |
| Qoys | $64.67 | $129.35 | $140.12 | $94.36 | $188.73 | $204.47 |

*** Shirkadda caymiska Nationwide Life masuul kama ah bixinta caymisyadan.**
**Caymiska sare ee MEC ma codsan karaan dadyogw degan NV & VT. Sidoo kale caymiska ay heli karaan dadyowga degan KS & OH waa uu ka duwanaan karaa ka gobolada kale. Caymisyada qaar waa la wadaagi karaa. Wixii faahfaahin ah ka eeg shahaadada caymiska.**

Labada caymis ee MEC waxaa ku jir caymiska caafimaadka aasaasiga ah (MEC). Caymiska Caafimaadka Aasaasiga ah waxa uu ka dhigay adeegyada caafimaadka kahortagga kuwo fudud. Waxaad 100% ku helaysaa caymis adeegyada caafimaadka kahortagga ee sharciga caymiska caafimaadka, oo ay ku jiraan baaritaanada guud, talaalada, shaybaadhka, daawooyinka kahortagga iyo tallaalada Kofidh 19-ka. Waxaad helaysaa saddex baadhitaan oo COVID-19 ah sannadkiiba.

Waa inaad adeegsato shabakadda Caymiska Caafimaadka Xadidan ee PHCS. Shabakadan gudaheeda waxaad ka helaysaa 4,500 isbitaal, 900,000 xirfadlayaal caafimaad iyo 84,000 oo xarumo adeegyo caafimaad ah.

Dhammaan adeeg bixiyayaashaa caafimaad waa kuwo la hubiyay tayodooda oo la xaqiijiyay. Si ay kuu siiyaan adeegya iyo daryeelka ugu fiican ee aad baahan tahay.

## ADEEGYADA CAYMISKA KU JIRA

**Talaalka hargabka iyo kahortagga**

**Baaritaanada caafimaad**

- Dhiig-karka
- Subaga
- Macaanka

**Annual well-woman exam**

**Well baby and well child exams**

**Ka hortagga uurka**

- Habab ay ansixiyeen FDA oo aysan ku jirin daawoyinka xaaqidu
- Qalliimada lagaga hortago uurka

**Baaritaanada Kansarka**

- Mindhicirka weyn
- Naasaha

**Mawduucyada lagaala talinayo waxa kamida:**

- Isticmaalka daroogada iyo khamriga
- Walwalka iyo Walbahaarka
- Buurnida xad dhaafka ah iyo cuntada
- Rabshadaha iyo gacan hadalka guriga
- Xanuunada galmada la isugu gudbiyo
- Joojinta tubaakada




**Fadlan xasuusnow, Tiimka Adeegyada Kahortagga Maraykanka ayaa si joogto ah wax ka badal ugu sameeyaa qoraalkan, una dajiya shuruudaha sida da'da, jinsiga iyo xaaladda caafimaad si adeegyada caafimaad loo daboolo. Ka akhri shuruudaha hadda u degsan wabsaydkan, booqo www.healthcare.gov/preventive-care-benefits/.**

**MUHIIM:** Dhakhtarkaagu waxa uu ku siin karaa adeeg caafimaad oo ka hortag ah, sida baaritaanka subaga ama dufanka oo kale, marka aad ku booqato xafiiska. Xasuusnow in loo baahan yahay in aad lacagta qayb bixiso hadii ujeedada ugu weyn ee aad u tagtay aysan ahayn adeeg caafimaad oo kahortag ah, ama hadii dhakhtarkaagu uu si gooni ah kuugu

# ADEEGYADA DHEERIGA AH EE KU JIRA CAYMISKA.

## SHABAKADDA CAYMISKA XADIDAN EE PHCS

Caymis kasta waxaa ku jira helida isbitaal caymis oo kugu haboon oo kuu oggolaanaysa inaad bixiso qiimo macquul ah.

**RAADI SHABAKAD DARYEEL BIXIYE AH**

- **Shabakadda Caymiska Xadidan:** www.Multiplan.com/awp
- **Wac:** (888) 371-7427

## KU HEL ADEEGYADA CAAFIMAADKA MAQAL IYO MUUQAAL

Iyadoo la adeegsanayo Teladoc Primary360, waxaad ku heli kartaa Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah, Baahiyaha Caafimaad ee Guud iyo Adeegyada Caafimaadka Maskaxda. Adeeg si fudud loo heli karo oo tayo sare leh.

- **Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah:** La Kulanka koowaad $165; Kulamada ku xiga $99
- **Baahiyaha Caafimaad ee Guud:** La talin kastaa waa bilaash $0
- **Baaritaanka Sannadlaha ah:** Waxaad bixinaysaa 165$ la kulan kasta
- **Dhakhtarka Cilmu Nafsiga:** La Kulanka Koowaad $235; La Kulanka ku xiga $105
- **Dhakhtarka Shucuurta iyo Dareenka:** Waxaad bixinaysaa $95 la kulan kasta

Xasuusin: Waxaa jiri kara lacago dheeri ah oo uu bukaanku bixin doono, iyadoo ku xidhan nooca caymiska uu haysto.

## QALABKA QIYAASA QIIMAHA: HEALTHCARE BLUEBOOK

Ma u baahan tahay daryeel caafimaad oo aan ka hortag ahayn? Waxaa laguugu samayn karaa qiimo dhimis adoo booqanaya shabakadda aanu caymiska kula jirno. Isticmaal qalabka qiyaasa qiimaha si aad isu barbar dhigto qiimayaasha, qiyaasna aad uga hesho inta aad ka bixin doono jeebkaaga.

Waxaad si fudud u baajin kartaa lacag badan oo kaa bixi lahayd adoo samaynaya baadhid fudud kahor inta aadan ballansan. Waxaad ka isticmaali kartaa qalabka qiyaasa qiimaha adoo marka hore gudaha u galaya www.TheAmericanWorker.com ama wac (800) 517-4785.

**Qalabka qiyaasa qiimihu kuuma damaanad qaadayo inuu qiimahaasi noqon doono kaad bixinayso.**

## CAYMISKA SHILKA, DHIMASHADA IYO LAXAADKA EE CRUM & FORSTER

Shilalka lama filaanka ahi waa wax dhici kara oo adiga iyo qoyskaaga ku keeni kara kharashaad aydaan u diyaar garoobin. Caymiska Shilka, Dhimashada iyo Waayida Laxaadka ayaa ku siinaya lacag caddaan ah adiga ama qoyskaaga kadib xaaladda culus ee idinla soo daristay awgeed. Caymiskan waxaa bixiya Crum & Froster, waxaana maamula NAHGA.

- **Kharashaadka Shilka:** Ugu badnaan $5,000 halkii shilba
- **Dhimashada Kadiska ah iyo Waayida Laxaadka:** $15,000 Shaqaalaha / $7,500 Xaaska / $3,000 Ilmaha

# CAYMISKA ILKAHA

Caymiska ilkuhu waxa uu ka dhigayaa ilkahaaga kuwo cad, dhoola cadeyn leh oo caafimaad qaba. Daryeelka ilkuhu waa muhiim, sidaa awgeed inaad hesho caymis ilkaha oo kaa habaq tira la kulanka dhakhtarka kuuna sameeya qiimo dhimis waa daruuri. **Laguma siin doono kaadh aqoonsi ah caymiskan, waxaad aqoonsi ahaan u adeegsan doontaa lambarkaaga Social Secuirty-ga.**

Caymiskan waxaa bixiya shirkadda Ameritas.

| ADEEGYADA CAYMISKA ILKAHA | | | |
|---|---|---|---|
| CAYMISKA UGU BADAN EE LA BIXINAYO | | | |
| **Caymiska Sannadkii la Bixinayo** | Ilaa $1,000 qofkii caymiska ku jiraba | | |
| **Waxaad jeebkaaga ka bixinaysaa** | $20 halkii mar ee aad la kulanto dhakhtarka | | |
| ADEEGYADA CAYMISKA ILKAHA | MUDADA SUGITAANKA | LACAGTA AAD BIXINAYSO | |
| **Kahortag iyo Baaritaan**<br>Baaritaanada hubinta ilkaha, Cadaynta iyo Nadiifinta, sawirka, iwm. | Sugitaan ma jiro | Waxaa laga bixinaya 100% (MAC/MAB)* | |
| **Daawayn Aasaasi ah**<br>Ilko buuxinta, dhuux ka dilida, daawaynta ciradka, iyo saarida, iwm. | 3 Bilood | Waxaa laga bixinayaa 60% (MAC/MAB)* | |
| **Daawayn Sare**<br>Ilig dahaadhid, buuxinta foolasha, iwm. | 12 Bilood | Waxaa laga bixinayaa 50% (MAC/MAB)* | |
| HEERARKA | TODOBAADLE | LABA TODDOBAADLE | BILAHA NUS-BILLAHA AH |
| Shaqaale | $6.36 | $12.72 | $13.78 |
| Shaqaale + Xaas/Sawj | $15.87 | $31.74 | $34.38 |
| Shaqaale + Caruur | $10.96 | $21.92 | $23.75 |
| Qoys | $16.64 | $33.28 | $36.06 |

***MAC waa qiimaha u sarreeya ee caymisku kugu soo dalaci karo adeeg. Hadii aad doorato kuwo caymisku naga dhaxeeyo, waxaad jeebkaaga ka bixin doontaa qiimo yar. Hadii aad u tagto kuwa aanan caymiska ku wada jirin, waxaa laguu eegi doonaa MAB oo ah qiimaha u hooseeya ee dhakhaatiirta ilkuhu ay qaadaan goobtaada. Hadii dhakhtarka ilkuhu kugu soo dalaco wax ka badan MAB oo ah qiimaha u hooseeya ee la qaadaado goobtaas, adiga yaa jeebkaaga ka bixin doona.**

## HEL ISBITAAL CAYMIS BIXIYE AH

Wac (800) 659-2223

- Dooro 3

Booqo **www.Ameritas.com**

- Shabakada caymiska aad ku jirtaa waa "CLASSIC PPO"

Ameritas

In aad si joogto ah baaritaan ugu samayso aragaaga kaliya wax kama qabanayso inaad si fiican wax u aragto laakiin waxaa xilli hore la ogaanayaa xanuunada kugu soo socda. Booqo isbitaal ku jira shabakadda VSP Choice si aad si buuxda uga faa'idaysato caymiskaaga. **Laguma siin doono kaadh aqoonsi ah caymiskan, waxaad aqoonsi ahaan u adeegsan doontaa lambarkaaga Social Secuirty-ga.**

Caymiskan waxaa bixiya shirkadda Ameritas.

| ADEEGYADA CAYMISKA ARAGA | | | |
|---|---|---|---|
| CAYMISKA UGU BADAN EE LA BIXINAYO | | | |
| **Waxaad jeebkaaga ka bixinaysaa** | $10 Baaritaan ah, $25 Fareemka ama Lansiska[1] | | |
| ADEEGYADA CAYMISKA ARAGA | SHABAKADDA VSP CHOICE | KA BAXSAN SHABAAKADA CAYMISKA | |
| **Baaritaanka Indhaha Sannadlaha ah** | Caymiska bixinaya 100% | Waxaa laga bixinayaa ilaa $45 | |
| **Ookiyaalaha aragga** (halkii beer)<br>Araga Dhow / Fog<br>Araga Dhow, Fog / Dhexdhexaadka | <br>Caymiska bixinaya 100%<br>Caymiska bixinaya 100% | <br>Caymisku waa $30/ $50<br>Caymisku waa $65/ $100 | |
| **Bikaaca Macmalka ah/Kontakti**<br>Baaritaanka iyo Leekaynta<br>U adeegsiga qurux ahaan<br>U adeegsiga caafimaad ahaan | <br>Waxaad iska bixinaysaa $60<br>Waxaa laga bixinayaa $105<br>Caymiska bixinaya 100% | <br>Waxba laga bixin maayo $0<br>Waxaa laga bixinayaa $105<br>Waxaa laga bixinayaa $210 | |
| **Fareemka Ookiyaalaha** | Waxaa laga bixinayaa $105[2] | Waxaa laga bixinayaa $70 | |
| **Inta jeer ee aad helayso**<br>Baaritaanka / Lansiska / Fareemada | Waxaa loo eegayaa taariikhda aad heshay adeega<br>12 bilood / 12 bilood / 24 bilood | | |
| HEERARKA | TODOBAADLE | LABA TODDOBAADLE | BILAHA NUS-BILLAHA AH |
| Shaqaale | $2.12 | $4.24 | $4.60 |
| Shaqaale + Xaas/Sawj | $4.19 | $8.38 | $9.0 |
| Shaqaale + Caruur | $3.91 | $7.82 | $8.47 |
| Qoys | $5.98 | $11.96 | $12.96 |

**[1]Marka hore waa inaad bixisaa qaybtaada si caymisku u bixiyo inta kale.**
**[2]Hadii aad fareem ama ookiyaale dhamaystiran aad ka iibsato Costco, caymisku waxa uu bixin doonaa qiimaha ay Costco kusoo iibsato ookiyaalaha.**

## HEL ISBITAAL CAYMIS BIXIYE AH

Wac **(800) 877-7195**

Booqo **www.Ameritas.com**

- Shabakadda caymiska aad ku jirta waa "VISION: VSP"

# CAYMISKA XANUUNKA, DHIMASHADA, SHILKA IYO LAXAADKA

## CAYMISKA XANUUNKA/DHAAWACA

Noloshu waa mid ku tiirsan dakhli joogto ah, laakiin shilalka iyo jirrooyinka xoogani waxay kugu sababi karaa in aadan shaqo tagin. Caymiskani waxa uu kaa daboolaya kharashaadkaaga isagoo ku siinaya lacag caddaan ah hadii aad xanuunsato, dhaawacanto ama aad shaqi tagi kari waydo.

| CAYMISKA XANUUNKA AMA DHAAWACA | | | |
|---|---|---|---|
| **Caymiska Toddobaadkii** | Hal mar oo kaliyaa ayaa lagu siinayaa $150 | | |
| **Mudada uu Soconayo** | 26 toddobaad | | |
| **Mudada Sugitaanka** | 7 maalmood (Shilalka iyo Jirrooyinka) | | |
| HEERARKA | TODOBAADLE | LABA TODDOBAADLE | BILAHA NUS-BILLAHA AH |
| Qofka Shaqeeya oo Kaliya | $3.50 | $7.00 | $7.59 |

Caymiskan waxa kale oo ku jira xilliyada ay dumarku uurka leeyihiin ama ay dhalayaan.
**Caymiskan ma helayaan dadka ku degan CA, HI, NJ, NM, NY, RI, iyo VT.**
**Dadka degan CA, HI, NJ, NY, VT waxa caymiskan siiyaa gobolkeeda, mana wada heli karaan laba caymis oo isa saaran.**

## CAYMISKA DHIMASHADA KADISKA AH IYO WAAYIDA LAXAADKA IIBSIGA CAYMISKA NOLOSHA DHEERIGA IYO CAYMIS GALINTA UBADKA IYO XAASKA

Caymiskani waxa uu daboolayaa kharashaadka ay gali doonaan dadyowga adiga kugu tiirsan mustaqbalka. Iibsiga caymiska nolosha dheeriga ah waxa uu bixinayaa xaddi lacag ah oo cayiman marka aad dhimato.

Waxaad caymis galin kartaa ubadka iyo xaaska laakiin ogsoonow waa inaad adigu marka hore ku jirtaa caymiska nolosha. Caymiska ubadka ama xaaskaagu waa inuu leekaadaa ama ka yaraadaa caymiska aad adiga laftaadu ku jirto. Waa inaad ku xustaa cidda lacagta qaadanaysa foomka isdiwaangalinta ama wabsaydka aad ka maamusho caymiskaaga.

| CAYMISKA DHIMASHADA, DHAAWACA IYO WAAYIDA LAXAADKA | | | |
|---|---|---|---|
| Shaqaale | Waxaad helaysaa $10,000 | | |
| CAYMISKA XAASKA IYO UBADKA | | | |
| Xaaska/Sawjka<br>Child (6 months to 26 years)<br>Infant (10 days to 6 months) | Waxaan bixinaa $5,000<br>Waxaan bixinaa $2,500<br>Waxaan bixinaa $400 | | |
| HEERARKA | TODOBAADLE | LABA TODDOBAADLE | BILAHA NUS-BILLAHA AH |
| Shaqaale kaliya | $0.60 | $1.20 | $1.30 |
| Shaqaale + Xaas | $0.90 | $1.80 | $1.95 |
| Shaqaale + Caruur | $0.90 | $1.80 | $1.95 |
| Qoys | $1.80 | $3.60 | $3.90 |

**Caymiska dhimashada, shilka iyo laxaadka ma heli karaan dadka ku nool gobolada NM & VT.**

## SIDEE AYAAN U BIXIYAA LACAGTA CAYMISKA?

Kharashka caymiska waxaa laga jari doonaa mushaharkaaga.

## MAXAA DHACAYA HADII AANU MUSHAHAR IISO DHICIN?

Caymiskaaga si ku meel gaar ah ayaa loo hakin doonaa. Waxaana dib loo bilaabi doona marka uu mushahar kuuso dhaco.

## MAXAA DHACAYA HADII AAN CAYMIS CODSADO KADIB MARKA LA JOOJIYO CAYMISKAYGA?

Caymiskaaga waa laguu diidi doonaa, waxaad kharashkana ka bixin doontaa 100% jeebkaaga. Hadii laga joojo 30 cisho mudadii aadan bixin lacagta caymiska, waxaad si toos ah ugu bixin kartaa lacagta lagugu leeyahay xafiiska caymiska. Caymiskaagana dib ayaa looga shaqeysiin doonaa.

## SIDEE AYAAN USII WADAN KARAA CAYMISKA HADII LACAGTA LAYGA QAADIN?

Waxaad si toos ah lacagta ugu diri kartaa xafiiska caymiska si aad uga dheeraato in aan caymiska lagaa kala jarin.

## SIDEE AYAAN LACAGTA U BIXIN KARAA HADII AANAN BIXIN?

Waxaad ku bixin kartaa onlayn, taleefan ama boostada. Hababka lacagta lagu bixiyo waxaa kamid ah kaar, iyo jeeg. Waxa kale oo aad samayn kartaa in lacagtan si toos ah looga kaadhka ama bangigaaga.

**Onlayn:** Booqo www.TheAmericanWorker.com oo gudaha u gal qaybta shaqaalaha
**Taleefan:** Ka wac Xafiiska Caymiska (800) 517-4785
**Cinwaanka boostada:** 11910 Anderson Mill Rd #401, Austin, TX 78726

**XASUUSIN:** Hadii aad lacag bixinta ka dhigto mid si toos ah lagaaga gooyo, waa inaad la xidhiidho xafiiska caymiska si ay u joojiyaan lacag bixinta marka ay shaqadu kaa dhamaato. Hadii aadan joojin, caymisku waxa uu kusii dalaci doonaa akoonkaaga, dibna laguuguma soo celin doono lacagtaas.

## MUDDO INTEE LEEG AYAA KU BIXINAYAA HADII AAN SEEGO LACAG BIXIN?

Waxaad haysataa inaad ku bixiso muddo 30 cisho ah gudahood laga soo bilaabo markii lagu siiyay mushaharka. Hadii aadan ku bixin muddo 30 cisho ah gudaheed, ma awoodi doontid inaad lacagtaas bixiso mar kale.

## CAYMISKAYGA MA LA TIRTIRI DOONAA HADII AANAN BIXIN LACAGTA CAYMISKA

**Shaqaalaha Toddobaadlaha ah** ee aan bixin wax lacag ah 4 toddobaad oo isku xigta waa la tirtiri doonaa caymiskooda.

**Shaqaalaha laba jeer mushaharka qaata bishii** ee laba jeer oo isku xigta aan waxba laga jarin ama aan bixin iyagana waa la hakin doonaa caymiskooda.

**Shaqaalaha Bisha Mushaharka ku qaata** ee aan hal mar lacagta aan bixin iyagana laga tirtiri doonaa caymiskooda.

**Fadlan si taxadar leh dib ugu eeg mushaharkaaga si aad u hubiso in kharashka caymiska laga jaray iyo in kale. Hadii aan laga jarin si degdeg ah ula soo xidhiidh shirkadda caymiska ee American Worker si aad u samayso lacag bixinta, ugana baaqato in aan lagaa joojin caymiskaaga.**

## MA HELI DOONAA KAADH AQOONSI AH?

Marka u horeysa ee aad isdiwaangaliso caymiska caafimaadka guud, waxaa boostada laguugu soo diri doonaa macluumaad ku saabsan siyaasadda caymiska iyo kaadh aqoonsi. Hadii aad wax ka badal ku samayso caymiskaaga caafimaad, kaadh kale ayaa laguugu soo diri doonaa cinwaankaaga boostada. Waxaad codsan kartaa kaadh cusub adoo nala soo xidhiidhaya ama aqoonsi ku meel gaadh ah ka heli kara wabsaydkayaga www.TheAmericanWorker.com.

Wixii aan ahayn caymiska caafimaadka guud, siyaasadda caymisyadaas waxaa laguugu soo diri doonaa cinwaanka gurigaaga. Caymisyada ilkaha, araga iyo wixii kale ee soo raaca ma heli doontid kaadh aqoonsi.

## SIDEE AYAAN U ISTICMAALAA CAYMISKAYGA?

Marka aad baaritaan caafimaad marayso, weydii isbitaalka hadii ay ku jiraan shabakadda caymiska ee laguu qoondeeyay. Tus kaadhkaaga caymiska caafimaadka oo u sheeg inay wacaan qaybta adeega macaamiisha si loo hubiyo caymiska. Hubi marka hore inaad hesho isbitaal aanu caymis kula jiro kahor inta aadan raadsan daryeel caafimaad.

Marka aad ballan ka samaysanayso dhakhtarka ilkaha ama araga, u sheeg in shirkadda caymiska bixinaysa ay tahay Ameritas, waxayna ka xaqiijin karaan caymiska iyagoo isticmaalaya Lambarka Amniga Bulshada (Social Secuirty Number).

## MEELAHA AAD KA HELAYSO IYO CIDDA LALA XIRIIRAYO

| NOOCA CAYMISKA | SHIRKADDA AAD LA XIDHIIDHAYSO | WABSAYDKA | TALEEFAN LAMBAR |
|---|---|---|---|
| Caymiska Caafimaadka | The American Worker | **www.TheAmericanWorker.com** | (800) 517-4785 |
| Caymiska Shilka, Dhimashada iyo Laxadka (oo uu ku jiro Caymiska MEC) | Crum & Forster oo ay maamusho by NAHGA | **www.NCSR@nahgaclaims.com** | (800) 952-4320 |
| Adeega Caafimaadka Maqal iyo Muqalka | Teladoc | **www.Teladoc.com** | (800) 835-2362 |
| Caymiska Xanuunka/Dhaawaca | Nationwide oo ay maamusho American Worker | **www.TheAmericanWorker.com** | (800) 517-4785 |
| Iibsiga Caymiska Nolosha ee Dheeriga ah & Caymiska Xaaska iyo Ubadka | Nationwide oo ay maamusho American Worker | **www.TheAmericanWorker.com** | (800) 517-4785 |
| Caymiska Shabakada PPO | Shabakadda Caymiska Xadidan ee PHCS | **www.multiplan.com/awp** | (888) 371-7427 |
| Caymiska Ilkaha | Ameritas | **www.Ameritas.com** | (800) 659-2223 |
| Caymiska Araga | Ameritas | **www.Ameritas.com** | (800) 877-7195 |

## HORDHAC SHARCIGA CAYMISKA COBRA

Sharciga COBRA waxa uu xaq kuu siinayaa inaad sii wadato caymiska, waana sharci ay soo rogtay dawladda fadaraalku. Sharciga COBRA ee sii helida caymisku waxa uu kuu oggolaanayaa inaad sii hesho caymiska xitaa isaga oo kaa joogsaday. Xubnaha qoyskaaga ee hore ugu jiray caymiska way sii heli doonaan iyaguna xitaa isaga oo ka joogsaday. Wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan mas'uuliyadaha iyo xuquuqahaaga, waa inaad ka akhridaa Qaybta Faahfaahinta Macluumaadka Caymiska ee laguugu soo diray boostada kadib isdiwaangalintaada.

## WAA MAXAY SHARCIGA COBRA EE SII SOCOSHADA CAYMISKA?

Sharciga COBRA ee sii socoshada caymisku waxa uu kuu oggolaanayaa in caymiskaaga caafimaad kuu sii socdo xitaa hadii uu yimaado shay joojiya caymiskaaga ee loo yaqaan "xaaladaha waa weyn ee isbadalka nololeed. " Isbadalada nololeed ee waa weyn hoos ayay ku qoran yihiin. Hadii mid kamid ah isbadalaasi kugu dhacaan, sharciga COBRA waxa uu oggolaanayaa in qof kasta oo hore ugu jiray uu sii wato caymiskiisa sida adiga, xaaska iyo caruurta oo loo yaqaan "dadyowga xaqqa u leh inay sii wataan caymiska" laakiin si uu usii socdo caymisku waa inaad iska bixisaan lacagta caymiska.

Hadii aad tahay shaqaale, waxaad u qalantaa caymiska COBRA, hadii aad ku waydo caymiskaa caafimaad sababtoo ah:

- Saacadihii aad shaqeynaysay oo lagaa dhimay
- In shaqada lagaaga joojiyay sababo kale oo aan ka ahayn fal anshax xumo ah

Hadii aad tahay xaaska/sawjka qofka shaqeeya, waxaad u qalantaa caymiska COBRA hadii aad ku waydo caymiskaaga sababtoo ah:

- Xaaska/Sawjkaaga oo dhintay awgeed
- Xaaska/Sawjkaaga oo laga yareeyay saacadaha shaqada
- Xaaska/Sawjkaaga oo uga tagay shaqada sababo kale oo aan ahayn akhlaaq xumo
- Xaaska/Sawjkaaga oo helay caymiska Medicare (Qaybta A ama Qaybta B ama Labadaba)
- Adiga iyo Xaaskaaga oo u kala tagay si sharci ah ama isfuray

Sidoo kalena caruurtaadu waxay heli doonaan caymiska COBRA hadii ay ku waayeen caymiskooda mid kamid ah kuwan soo socda:

- Waalidka oo dhintay
- Waalidka oo saacadaha shaqada laga yareeyay
- Waalidka oo uga tagay shaqada sababo kale oo aan ahayn anshax xumo
- Waalidka oo helay caymiska Medicare (Qaybta A ama B ama Labadaba)
- Waalidka oo si sharci ah u kala tagay ama isfuray
- Adiga oo dhaafay da'da ku tiirsanaanta waalidka (sida gaadhay 26)

## GOORMA AYAA LA HELAA CAYMISKA COBRA?

Caymiska COBRA kaliya waxaa la heli karaa marka lagu wargaliyo maamulaha caymiska isbedelo nololeed oo waa weyn oo dhacay.

Loo shaqeeyuhu waa inuu ku wargaliyaa qofka maamula xogta caymiska shaqaalaha hadii isbedaladan soo socda midkood uu dhacdo: heshiiskii shaqada oo dhamaaday, saacadaha oo la dhimay, qofkii shaqeynayay oo dhintay, loo shaqeeyihii oo kacay ama musalafay, ama qofkii shaqeynayay oo helay caymiska kale ee Medicare (qaybta A, qaybta B ama Labadaba).

**Hadii aad u baahan tahay macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan caymiskaaga, u laabo macluumaadka iyo dukumintiyada caymiska ee ramsiga ah. Hadii ay is khilaafaan waxa ku qoran hagahan iyo dukumintiyada caymiska ee rasmiga ah, waxaa la raaci doonaa waxa ku qoran dukumintiyada caymiska ee rasmiga ah.**

**Dadyowga ku nool New Mexico iyo Vermont kama qayb qaadan karaan barnaamijyada caymiska ee ay bixiso The American Worker.**

**Shirkadda Nationwide iyo Nationwide N iyo Eagle waa sumadaha adeega Nationwide Mutual Insurance Company.** Caymiska waxaa bixinaya Nationwide Life Insurance, ee saldhigeedu yahay Columbus, Ohio (CA COA #7032). Caymiskan xadidan waa mid raacaya foomka siyaasadda SRCP 2000 ama u dhigma ka gobolada kale. Caymiska PRAM RX waxa uu adeegsadaa foomka siyaasadda GPDP A0 L20 laakin lagama heli karo dhammaan gobolada oo dhan. Caymiskani waa mid kaa bixinaya rasiidhada daawooyinka laakiin kaama bixinayo kharashaadka isbitaalka ee aasaasiga ah, kharashaadka caafimaadka ee aasaasiga ah ama kharashaadka caafimaad ee waa weyn sida uu qeexayo Xeerka Adeegyada Maaliyadda ee Waaxda Gobolka New York. NSM-0301AO (06/23). Caymiska waxaa maamula oo bixisa Fringe Benefit Group. Nationwide iyo Fringe Benefit Group waa laba shirkadood oo kala madax banaan oo aan wax xidhiidh ah oo is hoos yimaada aan lahayn.

**Caymiska Caafimaadka Aasaasiga ah (MEC) iyo Caymiska Sare ee Caafimaadka Aasaasiga ah:** Labadan caymis waxay ku siinayaan caymiska caafimaadka aasaasiga ah ee uu kaaga baahan yahay sharciga canshuurta Maraykaynu. Dadyowga aan galin caymisyadan waxay canshuur dhimis ka heli karaan dawladda, taas oo hoos u dhigaysa lacagta ay caymiska bixinayaan ama lacagta ay ku bixiyaan adeegyada caafimaadka laakiin waxay kaliya helayaan hadii ay isdiwaangaliyaan ama is qoraan caymiska dawladda. Dadyowga ku biira caymisyada MEC ma heli doonaan canshuur dhimis inta ay ku jiraan caymisyadan. Caymisyadani kaama daboolayaan kharash kasta taas macneheedu waa maaha caymis dhamaystiran. Waxaa jira shuruuc sheegaysa waxa ay kaa bixinayaan iyo waxa kale ee aanay kaa bixin karin.

**Caymis Xadidan:** Barnaamijkan caymiska ahi kuuma badali doono hadii aad hore u haysatay caymis dhamaystiran ama aad rabtay in aad hesho. Qorshaha caymiskani kuma siin doono caymis buuxa oo dhamaystiran ama inuu kaa bixiyo xaaladaha degdeg ah ee caafimaad ee aadka u daran. Dukumintigan kaliya waxa loo isticmaalayaa inuu ku siiyo sharraxaad kooban. Shirkadda Nationwide Life Insurance ayaa bixinaysa caymiskan xadidan. Wixii macluumaad dheeri ah waxaad heli doontaa marka aad isdiwaangaliso barnaamijka. Waxyaabaha qaar lama caymiyo, waxaana jira xadidaad caymiska ah. **Dadyowga degan Massachusetts** waxay heli karaan caymiskan laakiin maaha mid buuxinaya shuruudaha caymiska caafimaadka u degsan gobolka. **Caymiskan xadidan (a) badal uma noqonayo caymiska caafimaadka aasaasiga ah ee uu sheegayo sharciga ACA, (b) mana xisaabsana inuu yahay caymiska caafimaadka aasaasiga ah ee uu sheegayo sharciga ACA.**

**Faqrada 125 Afeef:** Hadii aad is-diwaangaliso waxaad xulanaysaa in aad ka qayb qaadato caymiska The American Worker, taas oo ay ku jiraan caymisyada ay oggol yihiin sharciyada shuruucda (faqradooda 79, 105, 106, 125 iyo wixii wax ka badal ah ee lagu sameeyo sharciyadan). Waxaad oggoshahay in lacagta caymiska laga jaro mushaharkaaga kahor inta aan lagu xisaabin canshuurta. Waa in aad fahamsan tahay in lacagta aad ku heli jirtay Social Security-gaagu ay hoos u dhici karto sababtoo ah mushaharkaagu waxa uu u muuqan doonaa mid sii yar maadaam laga sii jaray lacagta caymiska aad ku bixisay. Caymiskani waxa uu ahaan doonaa mid shaqeeya sannadka oo dhan. Mana badali kartid ilaa ay kugu timaado isbedel nololeed oo weyn mooyee. Isbedelada nololeed waxaa kamid ah: Inaad guursato ama furniin yimaado, xaaska/sawjka oo dhinta, ilme idinka dhinta, inaad heshid ilme aad korsato, ama ninkaaga oo hela shaqo cusub oo isbedel ku keenta caymiska. Marka aad isdiwaangaliso waxaad oggoshahay dhammaan shuruucdaas laguu qeexay

**Kharashaadka Dhaawaca Shilka:** Tani waa sharraxaad yar oo kooban oo ku saabsan caymiska dhaawacyada shilka. Siyaasadda caymiska ee dhamayska tiran waxaa ku xusan dhammaan shuruucda, waxaa laga cayminayo, qeexida ereyada, iyo faahfaahinta caymiska oo dhamaystiran. Waxyaabaha caymiska ku jira waa ay ku kala duwan yihiin gobolada Maraykanku. Dhammaan macluumaadka ku saabsan waxa uu caymisku kaa bixinayo waxa ay ku xusan yihiin dukumintiga siyaasadda caymiska ee aad haysato. Hadii ay is khilaafaan qeexidan yar ee kooban iyo siyaasadda caymiska ee rasmiga ah, waxaa loo noqonayaa oo marjac ah siyaasadda caymiska ee ramsiga ah.

**Shirkadda Teladoc:** © Teladoc Health, Inc. Wixii xuquuq ah iyada ayay u ilaashan yihiin. Teladoc iyo sumadda Teladoc waxaa iska leh Teladoc Health, lamana isticmaali karo oggolaansho la'aan. Adeegyada Teladoc badal uma noqonayaan dhakhtarkaaga joogtada ah. Teladoc ma damaanad qaadayso inaad helayso warqadda daawada marka aad isticmalayso adeegyadooda. Adeegyada Teladoc waxa maamula shuruucda gobolada Maraykanka, lagama heli karo gobolada qaar. Teladoc kuuma qori doonto daawooyinka ay maamulan DEA, kuwa aan loo isticmaalayn inay xanuun daaweeyaan ama daawooyinka sida sharci darrada loo isticmaalo. Dhakhaatiirta la shaqeeya HealthiestYou, way kuu diidi karaan daryeelka caafimaadka hadii ay aaminsan yihiin inaad ujeedooyin qaldan u isticmaalayso.

**Afeef: Ameritas**
Caymisyadan ma helayaan dadka degan Massachusetts, New Mexico, ama hadii shirkad ku taala Washington ay shaqaaleheeda u qalma caymiskan ay ka yar yihiin 50 qof. Caymisyada way ku kala duwan yihiin goboladu, waxaana shuruuc kala duwan oo ka jirta gobol kasta. Macluumaadkan looma adeegsan doono New Mexico. Dhamaan caymisyadan kala duwan waxaa bixinaysa Ameritas Life Insurance Corp ama Ameritas Life Insurance of New York. Caymisyada araga iyo ilkaha waxay yeelan karaan taariikho kala duwan iyadoo kolba ku xidhan gobolka. Ameritas iyo sumada bison waa calaamada ganacsi ee Ameritas Life.

Xadidaadaha iyo Waxa aanu Bixin Doonin Caymisku:
Caymiska Ilkaha
- Caymisku ma bixin doono daawaynaha ay ujeedadeedu tahay is qurxinta ilaa lagu xuso liiska rasmiga ah ee dhakhtarka ilkaha.
- Hadii hore laguugu galiyay ilig kaa maqnaa, caymisku ma bixin doonaa hadii aad rabto inaad ku badasho muddo sideed sanno ah gudaheed. Laakiin badalida hadii ay keento dhaawac kusoo gaadhay intii aad caymiska ku jirtay, midan caymisku wuu bixin doonaa. Marka u horeysa ee galinta ilig caymisku ma bixin doonaa, ilaa hadii iliga lagaa saaray intii aad caymiska ku jirtay mooyee. Hadii iliga lagaa saaray uu ahaa gaws caqliyeedka, kaasi isagu ma qormo oo caymiska kuma jiro. Buuxinta iligu waa inay badalayso mid lagaa saaray. Hadii shirkadu ay leedahay 35 qof ama ka badan oo shaqaalaha bilowga hore isdiwaangalinta, sharcigani iyaga ma khuseeyo.
- Hadii shaqo laga qabtay ilkahaaga kahor inta aanu caymisku kuu bilaabmin, caymisku ma bixin doono lacagtaas. Caymisku sidoo kale ma bixin doonaa waxyaabaha ilkaha lagu xidho ee lagu dhex waayo ama ku luma dhakhtarka gudihiisa. Caymisku sidoo kale ma bixiyo fantax/fanax biinta, qorida ilkaha iyo isku dhajinta ilkaha.
- Hadii hawsha laguu qabanayaa aysan ku qornayn liiska rasmiga ah ee adeegyada dhakhtarka, sidoo kale caymisku kaama bixin doono.
- Hadii daawaynta laguu samaynayaa aysan ahayn mid daruuri ah ama aysan ahayn mid laysku waafaqsan yahay, lama caymin doono sidoo kale

Waxa aad ka heli kartaa liiska xadidaadaha iyo waxa caymisku aanu bixin doonan oo dhamaystiran oo faahfaahsan Shahaadada Caymiska.
Caymiska Indhaha
- Waxa kaliye ee aad heli kartaa baaritaanada indhaha, lansiska ama fareemyada inta jeer ee uu caymisku oggol yahay. Hadii samayso wax ka badan intii la oggolaa, lagaama bixin doono.
- Hadii aad hore u martay baarid indhaha ah ama aad dalbatay fareemyo kahor inta aanu caymiskaagu kuu bilaabmin, kharashaadkan lama bixin doono.
- Hadii caymiskaagu uu dhamaado, kadibna aad marto baadhitaan indhaha ah ama aad dalbato fareemyo, lagaama bixin doono - Ilaa caymiskaagu uu oggol yahay waqti dheeri ah mooyee.
- Qalabyada gaarka ah ee loogu talo galay araga soo gaabtay, jimicsiyada indhaha ama baaritaanada la xiriira lagaama bixin doono.
- Ookiyaalaasha indhaha ee aanu dhakhtar kuu qorin ama aad qurux u qaadatay lagaama bixin doono.
- Hadii dhalada ookiyaala ama fareemku kuu jabo ama lumo, caymisku kaama bixin doono ilaa ay ka gaadhayso waqtigii aad badali lahayd.
- Hadii ay shaqadaadu kaaga baahan tahay inaad soo marto baaritaan indhaha ah ama ookiyaale, caymisku ma bixin doono kharashkaas.
- Qalliinka indhaha ama xanuunada kale ee daawaynta u baahan ee indhaha, caymiskuna ma bixin doono

Waxa aad ka heli kartaa liiska xadidaadaha iyo waxa caymisku aanu bixin doonan oo dhamaystiran oo faahfaahsan Shahaadada Caymiska.

Waxa aad ka heli kartaa liiska xadidaadaha iyo waxa caymisku aanu bixin doonan oo dhamaystiran oo faahfaahsan Shahaadada Caymiska. aymiskan ma iibsan karaan dadyowga degan Massachusetts ama New Mexico. Sidoo kale hadii shirkad ku taal Washington ay shaqaalaheedu ka yar yihiin 50 qof, caymis ma heli karaan. Adeegyada uu caymisku bixiyaa way isbadali karaan iyadoo kolba ku xidhan gobolka, gobol kasta oo Maraykuna uu leeyahay shuruuc u gaar ah. Si aad u aragto qoraalka oo dhamaystiran, waxa ay xadidaadu saaran tahay ama aan shirkadda caymisku kaa bixin doonin, ka hubi dukumintiga rasmiga ah ee loo yaqaan Shahaadada Caymiska. Dukumintigan ama macluumaadkan ma isticmali doonaan dadka ku nool New Mexico. Shirkadda Ameritas Life Insurance Copr ama Ameritas Life Insurance of New York ayaa ah midda bixinaysa caymiska. Caymiska araga iyo ilkaha ayaa leh taariikho kala duwan oo ay bilaabmaan iyadoo ku xidhan gobolka iyo sumada uu wato (9000 Rev. 03-16 or 9000 NY Rev.03-15). Ameritas iyo sumada bison waa calaamadda u diwaangashan ee ay ku hawl gasho Ameritas Life.

Hagaha Is-diwaangalinta Caymiska

THEAMERICANWORKER.COM / (800) 517-4785

Xuquuqda Daabacaada © 2025 The American Worker, waxaa mas’uul uga ah; Fringe Benefit Group.